



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod. 39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 10aad
Taariikhda: 29 Nofeembar, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:33 AM	Saacadda uu Xirmay: 12: 08 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi.	Guntanka Kulanka: 30 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiirka Wasaaradda Qorsheynt, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Mudane Maxamuud Sheekh Faarax Beenebeene. 2. Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Mudane Ilyaas Sheekh Cumar.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka Kariimka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed. 4. Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Dib u eegista Sharciga La Dagaalanka Burcad Badeedka iyo ka hortaga afduubka.

Furitaanka Kulanka:

Senator Xuseen Maxamed Daahir ayaa akhriyey Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajandayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka

fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajendaha kulanka, codaynta ayaa u dhacday sidaan:

Oggol: 29 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa u yeeray Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Arrimaha Dibadda Iskaashiga Caalamiga iyo Qorsheynta Maalgashiga Senator Cabdiwali Ibraahim Garyare, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 3aad ee Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed. Warbixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa cod geliyay ansixinta Hindise Sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 29 Senator

Ka aamusay: Majirin

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Wasiirka Wasaaradda Qorsheynt, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa senatarada uga mahadceliyey ansixinta Hindise sharciyeedkaan. Intaas kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Caddaaladda iyo Arrimaha Dastuurka Mudane Ilyas Sheekh Cumar, si uu Golaha uga hor akhriyo Warbixinta Akhrinta 1aad ee Hindise Sharciyeedka Dib u eegista Sharciga La Dagaalanka Burcad Badeedka iyo ka hortaga afduubka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajendayaasha kulanka.
2. Ansixinta Hindise-sharciyeedka Dhisidda Hay'adda Maalgashiga Soomaaliyeed.
3. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray maamulka Golaha in Hindise Sharciyeedka Dib u eegista Sharciga La Dagaalanka Burcad Badeedka iyo ka hortaga afduubka, loo gudbiyo Guddiga ku shaqada leh si ay uga gutaan waajibkooda ugana soo diyaariyaan warbixinta akhrinta 2aad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray Sacadu markay ahayd **12: 08 PM.**

DHAMAAD